
VALG

Doorashada aqalka baarlamaanka iyo saamaha 2025

Somali / Soomaali

# Warbixin muhiim ah oo ku socota qofka codeynaya

Maalinta doorashadu waa 8.da sebtember.
Soo qaado oo xasuuso aqoonsigaaga.



# Doorashda aqal aqalka baarlamaanka iyo aqalka saamaha 2025

Afartii sanaba waxaa la doortaa xilldhibaanada nagu matalaya aqalka baarlamaanka. Shaqada ugu muhiimsan ee baarlamaanku waa in uu ansixiyo xeerarka ama sharciyada, in uu go,aan ka gaaro miisaaniyad sanadeedka dalka iyo la xisaabtanka xukuumadda.

Sametinget ama aqalka matala dadka saamaha waa xubno baarlamaan oo lagu doorto dalka Norwey, waa xubno la doorto oo madaxbanaan. Macluumaad ku saabsan aqalka sametinget ka aakhriso samtinget.no

Warqadaan waxaa ka helaysaa macluumaad ku saabsan doorashada baarlamaanka iyo sida aad ku codeyn karto.

### Maalinta doorashadu waa isniin 8.da sebtembar 2025.

Degmooyin badan waxaad ka codeyn karta axada oo ku beegan 7. da sebtembar. Laga bilaabo 11.ka agoosto ilaa 5.ta sebtembar, waxaad codkaaga ka dhiiban kartaa meel kasta oo aad wadanka ka joogto. **Xasuuso aqoonsigaaga.**

## Xasuuso in aad soo qaadato aqoosigaaga marka aad codeyneyso.

Aqoonsiga waa inuu ka koobnaadaa magaca, taariikhda dhalashada, iyo sawir. Tusaale ahaan, wuxuu noqon karaa baasaboorka, kaarka aqoonsiga qaran, laysanka darawalnimada, ama kaarka bangiga oo leh sawir.

Haddii aad ku sugan tahay xarun sida guriga-daryeelka dadka waaweyn isbitaal, ama xabsi, shaqaalaha halkaas ka shaqeeya ayaa xaqiijin kara aqoonsigaaga. Shaqaaluhu waa inuu isna keenaa aqoonsigiisa.

## Yaa codeyn kara?

Doorashada baarlamaanka waa u codeyn kartaa hadii aad :

- Aad haysato dhalashada dalka Norwey
- Da,daadu gaartay18 sano sanadkaan 2025 gudihiisa
- Ka diiwaangashan tahay diiwaanka dadweynaha daganna dalka Norwey.

## Goormaa codeyn kartaa xageese ka codeyn kartaa?

**Codkaaga waad sii dhiiban kartaa** laga bilaabo isniinta 11.ka agoosto ilaa jimcaha 5.ta sebtembar waxaadna ka codeyn kartaa magaalo kasto oo aad joogto.

**Maalinta doorashada** waxaad ka codeyn kartaa magaalada aad ka diiwaangashan tahay oo aad dagan tahay 30.ka june 2025. Codka waxaad ka dhiiban kartaa meelkasta oo magaalada ka tirsan oo sanduuqda codeyntu taallo.

Hadii aadan awoodin in aad codkaaga sii dhiibato ama aadan codeyn karin maalinta doorashda? Waxaad sameyn kartaa in aad degmadaada ka codsatid in aad codkaaga aad sii hormariso laga bilaabo 01.da luulyo.


Waxaad codka ka dhiiban kartaa adigoo jooga dalka dibadiisa laga bilaabo 01.da july ilaa 29.ka agoosto

Ka hel goobtada codbixinta **valglokaler.no**


## Sidaan uga codee degmadaada





Qaado warqada codbixinta oo aad isticmaali doonto.




Isku laab warqadda codbixinta adigoo magaca xisbiga gudaha gelinaya, halka goobta shaabadeynta ay bannaanka noqoto – si cidna uusan u arkin cidda aad u codaysay.
Lama isticmaali karo bashqad ama wax kale oo daboolaya warqadda codbixinta.




U tag shaqaalaha doorashada si shaabad loogu dhufto warqadda codbixinta dusheeda. Tani waa muhiim si codkaaga loo ansixiyo.




Warqada codbixinta ku rid sanduuqa codbixinta.

## Sidaan ayaad uga codeyn kartaa meel ka baxsan degmadaada

Haddii aad codkaaga ka dhiibaneyso meel ka baxsan degmadaada, waxaad heli doontaa warqadda codbixinta oo ay ku qoran yihiin magacyada xisbiyada siyaasadeed ee diiwaangashan, kuwaas oo helay ugu yaraan 5000 cod guud ahaan dalka doorashadii hore ee baarlamaanka, ama kuwa la diiwaangeliyay doorashadii ka dib. Waa inaad calaamadaysaa xisbiga aad rabto inaad u codeyso. Warqadda codbixintu ma laha magacyada musharrixiinta xisbiyada.

Hadii aad xisbiga ama kooxda aad rabto in aad u codeyso aan lagu qorin warqaddda codbixinta, waxaad ku qori kartaa magaca xisbiga ama kooxda.

Codkaaga waxaa loo diri doonaa degmadaada si loo tiriyo.

Haddii aad xanuunsan tahay ama naafo tahay, waxaad la xiriiri kartaa degmada si aad codkaaga horey ugu dhiibato adigoo gurigaaga jooga. Waqtiga kama dambaysta ah ee lagu codsan karo in guriga lagu codeeyo waa Khamiis, 4-ta Sebtembar, saacadda 12:00 duhurnimo.

## Caawin ma u baahantahay si aad codgaaga uga dhiibato hoolka doorashad

La xiriir shaqaalaha doorashada haddii aad su'aalo qabto ama u baahan tahay hagitaan marka aad codeynayso. Shaqaalaha doorashada waxay saxiixeen waajibka sir qarinta.

Haddii aad leedahay naafonimo kugu adkeynaysa in aad keligaa codeyso, waxaad xaq u leedahay caawim. Waxaad ka heli kartaa caawin shaqaalaha doorashada ama qofkii kale oo aad rabto.

## Macluumaad ku saabsan xuquuqda codbixintana

Dhammaan dadka leh xuquuqda codbixinta waxay ka helayaan macluumaad laga soo diray waaxda doorashooyinka. Halkaas waxaad ku helaysaa caddeyn muujinaysa inaad xaq u leedahay inaad codeyso. Sidoo kale, waxaa ku qoran goobta iyo waqtiga aad ku codeyn karto maalinta doorashada, iyo macluumaad kale oo muhiim ah.

Macluumaadka waxaa laguugu soo dirayaa sanduuqaaga boostada dijitaalka ah ama Altinn. Haddii aad iska diiwaangelisay in aadan helin isgaarsiin dijitaal ah oo ka timid hay'adaha dowladda, ama aadan isticmaalin ID-porten muddo 18 bilood ah, macluumaadka waxaa laguugu soo diri doonaa warqad caadi ah.

La xiriir degmadaada haddii aadan helin macluumaadka ama haddii aad shaki ka qabto in aad xaq u leedahay codbixinta.

Horey waxaa loo diri jiray kaararka doorashada dhammaan codbixiyeyaasha. Habkan waa la joojiyay. Laga bilaabo doorashada baarlamaanka ee 2025, codbixiyeyaasha looma diri doono kaararka doorashada. Waxaad u baahan tahay oo kaliya inaad keento aqoonsi si aad u codeyso.

Macluumaad dheeri ka eeg **valg.no**

## Yaa la dooranayaa?

Marka doorashooyinka baarlamaanka la qabto, waxaa la doortaa 169 wakiil oo matalaya Baarlamaanka, kuwaas oo loo qaybinayo 19 degaan doorasho. 150 ka mid ah wakiilada waxaa si toos ah looga soo doortaa d eegaanada doorashada. Intaas waxaa sii dheer, waxaa la doortaa 19 wakiil oo isku dheelitir ah, mid kasta oo ka socda deegaankasta. deegaankasta.

## Doorasho qarsoodi ah

Doorashadu waa mid qarsoodi ah. Taasi micnaheedu waa in aad doorato warqad codbixineed oo aad isku l aabto adigoo kaligaa ah, iyadoo aan qof kale arkin. Doorashada qarsoodiga ah waxay kuu oggolaaneysaa inaad muujiso ra'yigaaga adigoo aan ka baqin in qof kale ogaado waxa aad ka codeysay.

Waxaa soo saaray guddiga doorashada sanadkan 2025.
Macluumaadkan waxaa lagu qoray bokmål, nynorsk, samisk, iyo 10 luuqadood oo kale. Wixii macluumaad dheeri ah gal oo eeg **valg.no**

**Halkaan iskaan garee si aad warqadaan ugu akhrisatid luuqado kale.**